

Mawduuca: Dhisme Cusub oo Dugsiga LEAP loo Rarayo Sannad-dugsiyeedka 2023-24

Ardayda iyo qoysaska qaaliga ah ee dugsiga LEAP,

Waxaan rajeynayaa inaad wakhti fiican qaadaneysid fasaxa xagaaga ee hadda kuu socdo. Waxaan warqaddan kuugu soo qorayaa inaan ku ogeysiyo isbeddel lagu sameynayo goobta barnaamijkeenna sannad-dugsiyeedka 2023-24. Fadlan ogow in tani aysan wax saameyn ah ku yeelanayn barnaamijkeena xagaagan ama sannad-dugsiyeedka soo socda; **isbeddelkani ma dhici doono ilaa laga gaarayo dayrta 2023.**

**Waxa aad u baahan tahay inaad oggaatid....**

- Iskoolka LEAP wuxuu u guuri doonaa John A. Johnson sannad-dugsiyeedka 2023-2024
- John A. Johnson wuxuu ku yaalaa dhinaca Bari ee Saint Paul, kaasoo dhanka galbeed ka xiga waddada Arcade Street ee 740 York Ave.
- Goobtan cusub waxay faa'iidooyin badan u leedahay bulshada dugsigeenna, kuwaasoo ay ka mid yihiin:
  - Helidda xarunta jimicsiga ee YMCA ee ardayda inta lagu jiro waxbarashada maalinta ee iskoolka
  - Qaboojiyaha dhismaha iyo daaqado waaweyn oo leh iftiin dabiici ah oo badan
  - Safarro xaddidan markii baska la qaato (iyadoon loo baahan in basas kale la sii raaco) taasoo anfaceysa arday badan oo hadda inoo joogta
  - Fasallo waaweyn
  - Qeyb dheeraad ah oo loogu talagalay ururada ardayda ka caawin kara fayo-qabidda

**Faahfaahin dheeraad ah:**

Aniga iyo dhowr shaqaale LEAP ah ayaa sannad-dugsiyeedkii hore la shaqaynaynay kooxda xilliga kala-guurka ee hindisaha Envision SPPS ee dugsigeena. Gu'gan iyo xagaagan, waxaan la kulannay shaqaalaha degmada si aan u hubinno in goobteenna cusub ay dabooli karto baahyaheenna. Talo soo-jeedinteenna ah inaynu u rarno barnaamijkeenna dhismaha John A. Johnson waxaa July 19 la horgeeyey Guddiga Waxbarashada, oo waxaynu billaabi doonaa in aynu ka shaqayno qorshayaasheenna guuritaanka dhawrka bilood ee soo socda.

Waan ogahay in isbeddelku uu adag yahay oo kala-guurka uu culeys ku noqon karo ardayda iyo qoysaska. Waxaan rabaa inaan kuu xaqiijiyo in go'aankan ay gaareen kooxdeenna maamulka iyadoo maanka lagu hayay danta iskoolkeenna. Dhismaha John A. Johnson wuxuu LEAP u noqon doonaa goob cusub oo fiican.

Fadlan i soo waca, i soo mara, ama ii soo dira iimayl haddii aad su'aalo qabtaan. Ku nasta inta ka harsan fasaxa xagaaga, oo waxaana rajeynayaa inaan dhowaan adiga iyo qoyskaaga arki doono.

Rose Santos, Maamulaha  
LEAP High School  
Taleefan: 651-228-7706  
Email: [rose.santos@spps.org](mailto:rose.santos@spps.org)